Ku saabsan soo gelidda Norway

Maqaal | La cusboonaysiiyay: 25.09.2021

Waxa hadda la gelayaa maalin caadi ah oo heegan sare leh. Xayiraadihii soo gelidda waddanka waxa loo qaadayaa si tartiib-tartiib ah.

25-ka Sebtember saacadda 16.00 ayaa xayiraadihii soo gelidda waddanka laga qaadayaa dadka ka imanaya EØS/Schengen iyo waddamada basaliga ah (waddamada ka baxsan EØS/Schengen ee Machadka Caafimaadka Dadweynuhu gartay in cudurku ku yar yahay). Tan oo ka dhigan in dadka waddamada EØS, dadka ka soo jeeda waddamo kale laakiin deggan aagga EØS iyo dadka deggan Ingiriiska iyo Iswissarland ay Norway soo geli karaan.

Xayiraadaha soo geliddu weli waxay qabanayaan dadka ka imanaya waddamo kale (kuwa loo yaqaano waddamada dameeriga ah).

Xaalado kala duwan ayaa keeni kara in dadkan laga dhaafo xayiraadaha:

- Ajnebiga si buuxda u tallaalan ama covid-19 ku dhacay lixdii bilood ee u dambeeyay, oo arrintaas caddayn kara iyagoo isticmaalaya shahaado koroona oo la hubin karo, oo ku xidhan nidaamka Midowga Yurub (eeg lifaaqa D ee xeer-hoosaadka covid-19)
- carruurta da'yarta ah ee la socda waalidkooda oo laga dhaafay xayiraadaha soo gelidda ka dib maadaama ay wateen shahaado koroona
- carruurta da'yarta ah ee la socda waalidkooda oo laga dhaafay xayiraadaha soo gelidda oo looga dhaafay sabab kale oo aan shahaado koroona ahayn
- ardayda ajnebiga ah ee boos waxbarasho sare ama boos iskuul ka helay xarun waxbarasho oo noorwiiji ah
- ardayda shahaadada diktoornimada (Ph.d) ka diyaarinaya xarun waxbarasho ama cilmi-baadhis oo noorwiiji ah
- ajnebiga booqanaya ama la deggi doona qof qoyskooda ah oo deggan Norway:
    - ajnebiga la siiyey oggolaansho (sharci) ku salaysan midayn qoys
    - ajnebiga ah xaaska/seyga, lammaane la diiwaangashan/la nool, carruurtiisa oo da'yar ama waaweyn muwaadin noorwiiji ah; marka qoysku wada deggan yahay dibedda, oo ay Norway ku soo booqanayaan muwaadinka noorwiijiga ah, ama ay u soo guurayaan qofkan jooga Norway.
    - ajnebiga ah xaaska/seyga, lammaane la diiwaangashan/la nool, carruurtiisa oo da'yar ama waaweyn qof deggan EØS oo safar shaqo ku jooga balse aan degganayn Norway,

marka ay Norway yimaadaan iyagoo la socda muwaadinka u dhashay EØS, ama ay u soo guurayaan qofkaas jooga Norway.

- ajnebi kasta, iyadoo aan loo eegayn waddanka uu muwaadinkiisa yahay ama deggan yahay, ee qof Norway deggan la leh xidhiidh noocyadan ah: Xaas/sey, lammaane diiwaangashan/wada nool ah, carruur da'yar ah iyo kuwa waaweyn, waalidka carruur da'yar ah iyo carruur waaweyn, awoowe/ayeeyo, carruurta loo yahay awoowe/ayeeyo, saaxiibbada 18 sanno ka weyn (iyadoo la isticmaalayo nidaam codsi ku salaysan oo loogu talagalay in oggolaansho hordhac ah lagu siiyo booqashooyinka saaxiibbada) iyo carruurta ka yar 18 sanno ee saaxiibbada

- ajnebiga carruurtooda la yeelanaya kulan/is-arag
- ajnebiga ku jira xaaladdo gaar ah oo tilmaamaya in qofkaas loo oggolaado soo gelidda waddanka, sida qofka masuuliyad daryeel ka saaran tahay dad jooga Norway, ama qaba xaaladdo kale oo nololeed oo waaweyn
- magangelyo-dooneyaasha iyo qaxootiga la soo qaatay
- dad xirfado/shaqooyin gaar ah leh. Suxufiyiinta, shaqaalaha badda iyo kuwa diyaaradaha, shaqaalaha gaadiidka badeecooyinka iyo dadka, diblomaasiyiinta iyo shaqaale ciidan, dadka Saamiga ah ee ku jira shaqada dhaqashada xoolaha, cilmi-baadheyaasha iyo xubnaha ka tirsan sahan cilmi-baadhis badeed ah
- ajnebiga looga maarmi karin shaqooyin bulshada aad ugu muhiim ah ama daboolidda baahiyaha asaasiga ah ee dadweynaha
- ajnebiga ay dawladda Norway casuumtay ama shaqaalaha hay'addo/ururro caalami ah
- ajnebiga diyaaradda ku beddelanaya garoon diyaaradeed oo ku yaalla Norway (duulitaammada caalamiga ah iyo kuwa Schengen gudaheeda ah ba)
- ajnebiga si joogto ah u deggan Svalbard, ama u baahan in ay sii dhexmaraan dhulka/berriga Norway iyagoo ku ama ka socda shaqo ama gurigooda Svalbard

Waa in qofku buuxiyo shuruudaha caadiga ah ee soo gelidda iyo joogista waddanka ee ku yaalla xeerka ajnebiga. Tusaale ahaan waa in ajnebiga fiisuhu waajib ku yahay ay fiisaha heleen ka hor intaanay waddanka soo gelin.

Ma ka mid tahay dadka Norway soo geli kara?

Haddii aad ka mid tahay dadka Norway soo geli kara, hubso shuruudaha lagaa rabo. Dadka qaar waxa weli waajib ku ah tijaabo qaadista, diiwaangelinta soo gelidda waddanka iyo karantiil.

Diiwaangelinta soo gelidda

Dadka waddanka soo gelaya ee karantiilku iyo/ama tijaabo iska qaadistu waajib ku noqonayaan ayaa laga rabaa in ay is diiwaangeliyaan. Haddii waalidka laga dhaafay is diiwaangelinta, waa in waalidku diiwaangelinta u sameeyaan carruurtooda ka yar 16 sanno. Marka aad dhammayso diiwaangelinta waxaad helaysaa raasiid aad tusayso booliska jooga barta hubinta (kantaroolka) xuduudda.

- Gal diiwaangelinta soo gelidda ee digitaalka ah

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo diiwaangelinta, wac Call Center oo lamabarkoodu yahay +47 33 41 28 70 ama e-boos u dir support@entrynorway.no

Karantiilka soo gelidda

Dadka socdaalka ah ee ka imanaya waddamada iyo aagagga cagaarka ah iyo kuwa liinta ah waxa laga dhaafayaa karantiilka soo gelidda waddanka, halka socdaalka ka imanaya waddamada ah casaan, casaan-madow, basali (waddamada uu FHI u arko in cudurku aanu ku badnayn) iyo waddamada dameeriga ah (dhammaan waddamada kale) waa in ay karantiil galaan. Waxase laga dhaafayaa dadka si buuxda u tallaalan ama cudurka koroonuhu ku dhacay lixdii bilood ee u dambeeyay. Arrintan waa in la caddayn karo iyadoo la isticmaalayo shahaado koroona ee la hubin karo, oo ku xidhan nidaamka Midowga Yurub.

Karantiilka waxa qofku ku gelayaa gurigiisa ama meel kale oo ku habboon. Muddada karantiilka oo 10 maalmood ah waa la soo gaabin karaa haddii tijaabo PCR ah la iska qaado oo cudurkana laga waayo ugu horreyn marka saddex maalmo ka soo wareegtay soo geliddii waddanka. Haddii aan la iska qaadin tijaabo noocaas ah, waa in 10 maalmo lagu jiro karantiilka. Nidaamkii hoteelka karantiilka waa la joojinayaa shardi ahaan, laakiin wuxu ahaanayaa fursad la siinayo dadka aan haysan meel ay karantiilka ku galaan.

Waa la joojinayaa shardigii ku saabsanaa karantiilka carruurta iyo dhallinyarada ka yar 18 sanno, laakiin waxa wacan in carruurtu ay tijaabo PCR ah iska qaado saddex maalmo ka dib.

- Khariidad muujinaysa waddamada/aagagga ku yaalla Yurub ee qofku karantiil gelayo markuu ka yimaado (Machadka Caafimaadka Dadweynaha)
- Karantiilka iyo xeerarka soo gelidda Norway – Machadka Caafimaadka Dadweynaha

Shaqaalaha iyo xeerarka karantiilka

Shaqaalaha iyo qandaraasleyda ajnebiga ah ee loo oggolaaday in ay waddanka ku soo galaan nidaamka codsiga ku salaysan ee ay maammulaan Agaasinka Socdaalka Badda iyo Agaasinka Beeruhu, waa in ay karantiilka soo gelidda ku qaataan goob ku habboon oo ay oggolaatay Hay'adda Kormeerka Goobaha Shaqadu.

- Eeg foom codsi oo ku jira arbeidstilsynet.no
- Codsi ku saabsan ka dhaafidda xayiraadaha soo gelidda waddanka (Agaasinka Socdaalka Badda)

Waajibka tijaabo iska qaadista

Waa la joojinayaa Shardigii tijaabo iska qaadista ee laga rabay socdaalka ka imanaya waddamada iyo aagagga cagaarka iyo liinta ah, laakiin weli waa laga rabaa socdaalka ka imanaya meelaha karantiilku waajib ku yahay qofkii ka yimaada, waa haddii cudurka koroonuhu hore ugu dhicin ama aanay si buuxda u tallaalnayn. Waa in ay arrintaas caddayn karaan iyagoo isticmaalaya shahaado koroona oo la hubin karo oo ku xidhan nidaamka Midowga Yurub. Waxa dhammaan dadka socdaalka ah laga dhaafayaa shardigii ahaa in ay tijaabo iska soo qaadeen 24 saacadood ka hor xilliga ay soo gelayaan waddanka.

- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waajibaadka tijaabo-qaadista (helsenorge.no)

Svalbard

Karantiilka soo gelidda waddanka waxa weli lagu gelayaa berriga ka hor intaan loo sii gudbin Svalbard. Waxa la joojinayaa shardigii ahaa in la iska qaaday tijaabo cudurka laga waayey ka hor intaan loo gudbin Svalbard.

Hubinta xuduudaha iyo goobaha tijaabada lagu qaado

Si tartiib-tartiib ah ayaa loo yaraynayaa kantaroollda xuduudda iyadoo saddex weji laga dhigayo. Wejiga koowaad waxa la oggol yahay 35 meelood oo ay waddanka ka soo geli karaan dadka aan si gaar ah looga dhaafin. Baraha xuduudaha ee xidhan waxa la furayaa marka degmada xuduudda ku taalla ay diyaariso nidaamka tijaabo-qaadista.

- Khariidad muujinaysa meelaha baraha xuduudaha ee furan ee leh goob tijaabo lagu qaado (Agaasinka Caafimaadka)

Hubinta doomaha lagu raaxaysto ee imanaya Norway – halkan eeg

Telefoon laga helo macluumaad ku saabsan soo gelidda waddanka, tijaabo-qaadista iyo karantiilka

- Markaad joogto Norway: 815 55 015
- Markaad joogo waddan kale: +47 21 89 80 42